# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

## DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

## لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 1 aad Garoowe, 25 Setember 1999 Lam,1R9

جريدة الشهرية

**FAAFINTA BILWALBA KA SOOBAXDA**

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland


Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

**TUSMADA**

Qaybta Koowaad

**Sharci**


- **Sharci Lam.7** ee 14/04/1999, "Dib u habaynta Xafiiska Diiwaangelinta Gaadiidka Dhulka (Ufficio P.R.P)"........Bogga....... **87**
- **Sharci Lam.8** ee 14/04/1999, "Khidmadda Dayuuradaha iyo Rakaabka"..Bogga...... **93**
- **Sharci Lam.9** ee 14/04/1999, "ku saabsan Hirgelinta Canshuuraha Dhexe (Canshuuraha Berriga) ........Bogga....... **96**
- **Sharci Lam. 10** ee 14/04/1999, "Canshuuraha Furadada........Bogga..... **103**
- **Sharci Lam.11** ee 14/04/1999, "Kuna saabsan Khidmadda ay qaado Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Beeraha iyo Deeggaanka........Bogga...... **116**
- **Sharci Lam.12** ee 19/04/1999, "Dakhliga Dawladaha Hoose iyo ku talagalka Miisaaniyadda Degmoyinka Puntland ........Bogga..... **118**


**Qaybta Labaad**

**Xeer**


**Xeer Madaxweyne No. 25 ee April 8, 1999, magacaabid Hawl-wadeeno Dawladeed, Bogga.... 128**


**Qayta Saddexaad**

[illegible], Ogaysiis IWM

**DAWLAD GOBO LEDKA BUNTLAN EE SOOMAALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**XAFIISKA MADAXWEYNAHA**
**OFFICE OF THE PRESIDENT**

*Tix :* ............................

*Ref. :*

*Tariikh :* ............................

*Date :*

**Sharci lam.7 ee 14/4/1999**
**U Rogid sharci rasmi ah Xeer-sharci lam.19 kuna saabsan Dib u Habaynta Xafiiska Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dhulka (Ufficio P.R.A.),**

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,**

**MARKUU ARKAY**: Axdiga Dawladda Puntland,

**ISAGOO TIXGELINAAYA**: Ansixinta Golaha Wakiilada ee ku cad warqadda summadeedu tahay GW/152/1999 taariikhdeeduna tahay 8/4/1999,

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

**Qod. 1aad**

Xeer-Sharci lam.19 kuna saabsanaa Dib-u-habaynta Xafiiska Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dhulka (Ufficio P.R.A.) ee Sharcigaan ku lifaaqan waa la ansixiyey waxana loo rogay sharci rasmi ah,

**Qod. 2aad**

Saddex nuqul oo sharcigaan ka mid ah, ee uu saxiixay Madaxweynaha iyo lifaaqiisa, waxaa loo qaadanayaa asal (originali) waxaana lagu kala kaydinayaa: Xafiiska Garyaqaanka Guud 1 (hal) nuqul; Xafiiska Xoghaynta Golaha Wakiilada 1 (hal) nuqul iyo Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada1 (hal) nuqul,

**Qod. 3aad**

Sharcigaanu wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Dawladda; waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda; wuxuu Sharcigaan ka mid noqonayaa sharciyada Dalka; Qof kasta waxaa ku waajib ah inuu dhowro kuna dhaqmo.

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIA

Garoowe 14/4/1999

40
88

# DAWLAD-GOBOLLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
## XAFIISKA MADAXWEYNAHA

Taar: 17/03/1999

**SHARCI LR 19 EE 17/03/99 SHARCIGA DIB U HABAYNTA XAFIISKA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA DHULKA**

MADAXWEYNAHA DAWLAD-GOBOLLEEDKA PUNTLAND

Markuu arkay Axdiga Dawlad-gobolleedka Puntland Qodobkiisa 32aad.
Markuu arkay Sharci Lr. 01 ee 01/02/1961.
Markuu arkay Sharci Lr. 02 ee 02/02/1963.
Markuu arkay Sharci Lr. 12 ee 22/01/1981.

Shuruucdaas oo dhammaantood qeexayaan Gaadiidka kala duwan ee dhulka iyo Wadayaasha.
Markuu arkay Baahida dhabta ah ee loo qabo in dib loo soo nooleeyo, loona habeeyo Nidaamkii iyo shuruuodii iyo Xeerarkii Gaadiidka kala duwan ee ku sugan dalka Puntland iyo kuwa ka soo gala Xuduudaha.

Markuu arkay talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.

Wuxuu soo saaray Sharcigan:-

**Qodobka 1aad.**

In dib loo habeeyo Xafiiskii Diiwaangelinta Gaadiidka dadweynaha ee PRA, lagana furo dhammaan Gobollada Puntland.

**Qodobka 2aad.**

Xafiiska Diiwaangelinta Gaadiidka Dadweynaha (PRA) wuxuu u xilsaaran yahay kana kooban yahay :-

b. Xafiiska Diiwaangelinta Gaadiidka iyo summad siinta
   -Kala wareejinta Gaadiidka iyo ka saaridda Diiwaanka.

t. Laysan bixinta:-
- In uu bixiyo Laysammada wadidda Gaadiidka dadka ku guulaysta imtixaannada laga qaado.
- Kaydinta Dukumentiyada iyo Diiwaanka Laysammada lagu bixiyo.
- Kala beddelidda Laysammada sida (1aad,2aad,iyo 3aad).
- Ka qaadidda Laysammada (Cancel)sida qof dembi lagu heley ama mid been abuur ah.
- Beddelidda Laysammada luma, ama loo arko in la beddelo amase buuxsama.

j. Tijaabinta iyo Imtixaannada:-
- Xaqiijinta qaab-dhiska Gaadiidka oo tafatiran iyo socodkaba.
- Imtixaan ka qaadidda dadka doonaya in ay qaataan Laysan, marka ay ku guulaystaan soona dhammaystiraan shuruudaha looga baahan yahay.
- Imtixaan ka qaadidda dadka doonaya in ay ka gudbaan heerka Lays kii hore una gudbaan derajada Laysanka xiga.

x. Gaadiidka dadweynaha:-
- Ilaalinta habka ku shaqeysiga iyo shafeeciga Gaadiidka dadweyn sida:-

kh. Ogolaanshaha Dugsiyada lagu barto wadidda Baabuurta:-
In uu Xafiisku u ogolaado oiddii doonaysa in ay furato Dugsiga barashada wadidda baabuurta marka ay soo buuxiyaan shuruudahan:-

1. Waa in uu leeyahay Gaadiid ku habboon barashada wadidda baabuurta.
2. Waa in uu haystaa Macallimiin aqoon xirfadeed u leh baridda baabuurta.
3. Waa in uu leeyahay qalab iyo manhaj waxbarasho oo habaysan.
4. Waa in uu ku yaalla Dugsigu meel ku habboon.

<u>Qodobka 3aad.</u>
Gaadiidka:-
Gaadiidka Puntland oo isugu jira yaryar iyo waaweyn iyo kuwa ka soo gala xuduudaha, Dekedaha iyo Garoomada Diyaaradaha waxaa lagu dhiqi doonnaa - Sharcigan:-
b. In Mulkiilaha amawakiilkiisa gaadiid isaga oo wata gaadiidka ay leeyihiin ka soo caddeystaan mulkiyadda lahaanshaha baabuurka Hay'adda ama Guddiga loo xilsaaray caddeynta iyo xaqiijinta Mulkiyadda saxa ah ee Gaadiidka.
t. Marka uu soo caddeysto Mulkiiluhu/wakiilkiisu waxa u waajibaysa in la siiyo ogolaansho dhaqdhaqaaq oo sharciyeysan oo kala ah:-
- Diiwaangelin iyo Summadsiinta.
- In loo sameeyo Taargo Gaadiidkiisa.
- Tijaabin guud oo tafatiran oo lagu sameeyo gaadiidkiisa.
- In uu bixiyo qiimaha diiwaangelinta, Taargada iyo Tijaabada oo mid waliba qiimo gaar ah leedahay sida sharcigu qeexayo.
j. Mulkiilayaasha la soo dega gaadiid ama xuduudaha kala soo gala lagama soo saari karo dekedaha, ilaa loo sameeyo diiwaangelin, Taargo iyo tijaabo. Sidoo kale kuwa xadka ka soo gala wax dhaqdhaqaaq ah kamaa samayn karaan gudaha Puntland ilaa ay maraan Sharciga.
x. Gaadiidka Puntland ka soo gala Woqooyi Galbeed iyo Koonfurta Soomaaliya ee sida joogtada ah uga shaqeysta Puntland waxba kama duwanka kuwa laga leeyahay Puntland, waxayna ku dhaqmayaan sharciyada kor ku xusan.Haddii aanay wax ka beddelin hab-dhaqankan.
kh. Gaadiidka ka soo gala Zoonka 5aad ee u kala goosha Puntland iyo Zoonka 5aad waxaa la siinayaa Warqad dhaqdhaqaaq oo mudaysan kuna caddahay - meesha uu u socdo, isagoo ka qaadanaya warqadda Xafiiska PRA ee ugu - dhow.
d. Gaadiidka Zoonka 5aad marka uu warqadda dhaqdhaqaaqa qaato waxaa laga qaadayaa Khidmad lacageed oo ku salaysan Tanka Baabuurka iyadoo Halkii Tanba loo xisaabinayo Sh.So.2,500/= Halkii tiriibba. Muddaduna waa 15 Cisho, haddii ay ka dhacdo muddadu waa loo cusboonaysiin karaa, iyadoo laga qaadayo Sh.So.20,000/= lana siinayo 15 Cisho oo kale, waxaanna - laga cusboonaysiinaya Xafiiska PRA ee ugu dhow.(Gaadiidka ugu badan waxa loo cusboonaysiin karaa 3jeer haddii aan wax cillad ah oo caddi ku iman),

r. Gaadiidka Zoonka 5aad ka soo gala inta uu joogo Puntland gudaheeda wax dhaqdhaqaaq ah kuma sameyn karo aan ahayn kii uu u yimid.

**Qodobka 4aad.**

**Laysanka:-**

Laysanku wuxuu u kala baxaa 3 nooc oo kala ah:-
1. Derajada 1aad (Primo Grado).
2. Derajada 2aad (Secondo Grado).
3. Derajada 3aad (Terza Grado).

Saddexdaas Laysan ee kala nooca ah waxaa laga bixin doonaa Xafiiska Gaadiidka Dadweynaha (PRA) sida ku cad sharciga, isla markaana qeexaya shuruudaha Qofka doonaya in uu qaato Laysanka Wadidda iyo qiimihiisaba.

**Laysan bixinta:-**

Qofka doonaya in uu Laysan qaato waxaa laga doonayaa:-
Warqadda Codsiga ama Arji iyo 2 Sawir.
1. Warqadda Codsiga ama Arji iyo 2 Sawir.
2. Waa in aysan Da'diisu ka yarayn 18 sanno.
3. Waa in Caafimaadkiisu taam yahay(Xagga dhimirka iyo laxaadkaba).
4. Waa in uu wataa Warqadaha dhalashada, Sugnaanta, Faraha, Caafimaadka indhaha IWM.
5. Waa in uu wataa Baabuurka uu Imtixaanka ku gelayo.
6. Markaa ayaa loo ogolaanayaa Imtixaanka, haddii uu ku guulaysto waxaa la siinayaa Laysanka, isagoo bixinaya Qiimaha Laysanka uu hadba soo cod-saday, Haddii uu ku dhaco waxaa dib loogu celinayaa Dukumentigiisii, - waxaanna loo ogolaanaya in uu dib Imtixaan u galo 30 Cisho ka dib, isagoo wata dukumentigiisii hore oo uu soo cusboonaysiiyey Warqadda Faraha ama dembi la'aanta iyo Indhaha.

Qofka qaata Laysanka Derajada 1aad (Primo Grado) waxa uu awood u leeyahay in uu ku wado Baabuurta yaryar ee aannu Tankoodu ka badnayn 1.5TON.

Qofka qaata Laysanka derajada 2aad (Secondo Grado) waxaa uu awood u lee-yahay in uu ku wado Baabuurta aan Rimoorka Lahayn oo dhan.

Qofka qaata Laysanka Derajada 3aad (Terza Grado) Waxa uu awood u leeyahay in uu wado nooc kasta oo baabuurta ka mid ah.

**Qiimaha Laysammada:-**

| | |
|---|---|
| 1. Laysanka Derajada 1aad Waa | Sh.So.133?000/= |
| 2. Laysanka Derajada 2aad Waa | Sh.So.250,000/= |
| 3. Laysanka Derajada 3aad Waa | Sh.So.200,000/= |

**Kala beddelidda Laysammada:-**

Qofka horey u qaatay Laysanka Derajada 1aad ee doonaya in uu qaato Laysan ka derajada 2aad wuxuu gelayaa imtixaan, isagoo wata warqadda Faraha iyo Indhaha, haddii uu ku guulaysto Imtixaanka waxaa la siinayaa Laysanka , iyadoo laga qaadayo qiimaha Laysanka cusub ee uu u gudbay. Haddii uu ku dhaco waxaa loo celinayaa warqadihiisii. Sidoo kale qofka haysta Laysan derajada 3aad wuxuu marayaa derajada 2aad ee doonaya inuu qaato Laysanka

Qodobka 5aad.

DIIWANGELINTA GAADIIDKA:-

1. Diiwaangelinta Gaadiidka Dadweynaha.
2. Diiwaangelinta Qaybaha Xukuumadda iyo Barlamaanka.
3. Diiwaangelinta Gaadiidka UNTA iyo Ururada Samafallada IWM.

Nooc kasta oo ka mid ahi gaadiidkaas wuxuu yeelanayaa Diiwaangelin u gaar ah, Taargo Gaar ah iyo Qiimayn Diiwaangelineed.

Diiwaangelinta Gaadiidka Dadweynaha:-

Gaadiidka dadweynaha waxaa la gelinayaa Diiwaan gaar ah, waxaanna la siinayaa Buugga Socodka Baabuurta, marka uu soo buuxiyo shuruudaha laga rabay, iyo Summad, waana la Tijaabinayaa waxaanna laga qaadayaa qiimo Diiwaangelineed, Taargada, iyo Tijaabada oo ah sida hoos ku qeexan:-

| | |
|---|---|
| 1. Qiimaha Diiwaanka iyo Buugga socodka Baabuurta | Shs. 80,000/= |
| 2. Qiimaha Taargada horey iyo Gadaal | Shs. 200,000/= |
| 3. Qiimaha Tijaabada Baabuurka | Shs. 120,000/= |
| 4. Qiimaha Taargeda Rimoorka | Shs. 64,000/= |
| 5. Qiimaha Gaadiidka hal Taargo ah sida Wiishka IWM. | Shs. 96,000/= |
| 6. Taargada Mootooyinka kala duwan | Shs. 64,000/= |

Fiiro Gaar ah:- Gaadiidkasta waxaa ku waajibay in uu sannadkiiba bixiyo cashuurta socodka Baabuurta ee Wasaaradda Maaliyadda.

- Tijaabada Gaadiidluhu wuxuu ugu yaraan Lixdii biloodba marayaa - tijaabo qiimaheedu dhan yahay Shs. 58,000/=
- Taarikada Gaadiidka dadweynuhu waxay ka bilaabmaysaa PL Soomaaliya 1001 oo taxane noqon doonaa.

Diiwaangelinta Gaadiidka Dawlad-Goboleedka Puntland.

Gaadiidka Dawlad-goboleedka Puntland waxaa la gelinayaa diiwaan u gaar ah, waxaanna la siinayaa summadda ah DGPL oo ka bilowda 001 iyo buugga socodka Baabuurta.

Wadayaashada Gaadiidka Dawlad-goboleedka Puntland waxaa loo sameeyn doonnaa Laysan(Buugga Wadidda Gaadiidka) oo u gaar ah, marka uu la - yimaado kii Gaadiidka dadweynaha, hadba Baabuurka uu wadayo noociisa oo la mid ah.

Diiwaangelinta Gaadiidka UNta iyo Hay'adaha samafalka.

Gaadiidka Hay'adaha UNta waxay yeelanayaan Diiwaan u gaar ah, Taargo gaar ah oo midab u gaar ah leh, waxaanna laga qaadayaa mid walba - qiimaha nooca gaadiidkiisa loogu talagalay sida baabuurta dadweynaha.

Qodobka 6aad.

Taargada iyo noocyadeeda:-

1. Taarkada Gaadiidka dadweynaha waa plate madow ah, summadduna tahay midabka caddaanka oo leh astaanta Dawlad-goboleedka Puntland - (Amplema Somolo) iyo calaamadaha Haadka.

2. Taarkada Gaadiidka Dawlad-gobolleedka Puntland waa GDPL midabkuna waa madaw lambarkuna waa caddaan, wuxuuna kale oo yeelanayaa anstaant Dawlad-gobolleedka Puntland iyo calaamadaha Haadka.

3. Taarkada Ururada Samafallada iyo Hay'adaha Maalgashiga waa tan Gaadiidka dadweynaha oo kale lehna plate midabkiisu yahay Guduud.

4. Taarkada Hay'adaha UNta waxay leeyihiin qaab u gooni ah Tusaale ah Hay'adda UNDP baabuurkeedu wuxuu qaadanayaa (IUNO2) oo ah Kowda oo taagan Hay'adda lambarkeeda diiwaaneed iyo 02 oo ah Lambarka Gaadiid Midabka platekuna waa buluug.

Fiiro Gaar ah:-

1. Dakhliga soo gala Xafiiska Gaadiidka dadweynaha ee PRA 90% waxaa lag shubayaa Khasnadda dhexe ee Dawladda, 10% na waxaa loogu talagalay dhiirigelinta shaqaalaha Xafiiska Diiwaangelinta Gaadiidka dadweynah ee PRA.

-MD. Cabdullaahi Yuusuf Axmed-
(MADAXWEYNAHA DAWLAD-GOBOLLEEDKA PUNTLAND)